UNITED NATIONS **NATIONS UNIES**

Office for the Coordination of Humanitarian Affairs (OCHA) – SOMALIA

Warbixinta Xaaladda # 38 – 26 September, 2008

Is-beddellada guud ee ugu muhiimsan

Ugu yaraan 80 qof oo rayid ah ayaa ku dhintay, 100 kalena way ku dhaawacmeen toddobaadkan gudihiisa kaddib markii ay iska horimaadyo ku dhexmareen magaalada Muqdishu Ciidammada Midowga Afrika ee ka howlgala Soomaaliya (AMISOM) iyo kooxaha ka soo horjeeda dowlada. Sida ay xaqiijiyeen labada cisbitaal ee ugu waaweyn Muqdishu, ugu yaraan 110 qof oo dagaalkaas ku dhaawacmay ayaa la dhigay muddo seddex cisho ah gudahood. Waxaana laga yaabaa in tirada dhaawacu ay intaas ka sarreys, walow aan ilaa imminka warbixin laga helin Cisbitaallada iyo rugaha caafimaadka kale ee Muqdishu.
Waxay dagaalladaasi bilowdeen, kaddib markii ay garoonka Muqdishu soo caga-dhigteen labo diyaaradood 19kii iyo 20kii September, kuwaasoo ka dhaga-adaygay xayiraaddii ay labo toddobaad ka hor ku soo rogeen kooxda dhalinyaro diimeedka ee Alshabab isticmaalka garoonkaas. Degmooyinka Muqdishu ee ay dagaalladu sida ba'an u saameeyeen waxaa ka mid ah Hodan, Hawl Wadaag, Waaberi iyo Wadajir, kuwaasoo carqaladeeyey dhammaan dhaqdhaqaqyadii heer-nololeedka bulshada ayna ku bara-kaceen dadweyne fara badan oo naftooda la baxsanaya.

Sida ay xaqiijisay waaxda la socoshada barakaca dadweynaha ee UNHCR, qiyaastii ilaa 15,000 qof, ayaa ku bara-kacay intii dagaallaasi socdeen. Dadka bara-kacay, ayaa gaaray degmooyinka ay xasiloonidu ka jirto ee magaalada, halka ay kuwo kalena u carareen nawaaxiga Afgooye, iyadoo ku biiraya in ka badan 300,000 qof oo hore goobahaas ugu bara-kacay. Qaar kale, ayaa iyaguna u qaxay degmooyinka deriska la ah ee Marka, Qoryooley iyo Jowhar. Dadka cusub ee bara-kacay, ayaa u baahan qalabka dhismaha hoyga iyo gargaar cunto ah.

Isku-duwaha Gurmadka bini'aadminnimada deg-dega ah (ERC), John Holmes, ayaa wuxuu 19kii September ugu baaqay ergooyinka kala duwan ee deeq-bixiyayaasha joogtada ah inay u gurmadaan waddamada Geeska afrika oo ay soo food-saartay xaalad bini'aadminnimo oo deg-deg ah. Wuxuu war-saxaafadeedkiisa ku xusay, in 17 million oo qof ay bilaha soo socda u baahan doonaan gargaar deg-deg ah, isagoo intaas raaciyey in abaaraha soo noq-noqonaya ee Geeska afrika ay si xad-dhaaf ah u waxyeelaynayaan heer-nololeedka bulshada ku dhaqan wadmada Geeska Afrika. Dalka Soomaaliya, oo qiyaastii 3.2 million qof ay u baahan yihiin gargaar dhinaca bini'aadminnimada ah, ayaa isku-duwaha (ERC) baaqiisa ku sheegay inay Soomaliya ku yar tahay US$ 370 million iminka soo gaaray taas oo ka mid ah qiyaasta guud ee US$ 646 million oo loogu baahan yahay in lagu daboolo baahida dadweynaha tabaalaysan ee dalka.

Maraakiibta Ciidanka badda ee dawladda Canada oo galbinayey maraakiibta raashinka u siday WFP, ayaa kordhiyey hawlgalkooda ilaa 23-ka October. War-saxaafaded ay hay'adda WFP soo saartay 25kii September, ayaa waxay ku bogaadisay go'aanka ay muddada hawlgalka ku kordhisay, iyadoo shaaca ka qaadday in talaabadani ay farxad galinayso “Milaayiin qof oo baahi lixaad leh u qaba raashinka gargaarka bini'aadminnimada oo ay caqabad ku yihiin weerarrada burcad-badeedka ee ka dhanka ah maraakiibtaas.” 18kii September, waxaana Dekedda magaalada Muqdishu ku soo xirtay markab siday raashin gargaar ah oo dhan ilaa 4,000 metric oo ay galbinayeen maraakiibta waddanka Canada. Laga soo bilaabo bishii November 2007, waxaa si joogto ah isugu beddelayey ilaalinta maraakiibta raashinka gargaarka ah u sida WFP taas oo qeyb weyn ka qaatay maraakiibta ciidammada badda ee waddamada kala ah Canada, Netherlands, Denmark iyo Faransiiska, kuna guulaystay inay si nabadgelyo ah ku gaarsiiyaan raashin gaaraya ilaa 136,500 metric tons – kuna filan in lagu quudiyo 2.6 million qof muddo seddex bilood ah.

Waxaa Toddobaadan cabsi dheeraad ah, ay la soo deristay gaadiidka raashinka u sida hay'adda WFP, kaddib markii 25kii September, dabley hubaysan ay weerar jid-gooyo ah ku qaadeen Kolonyo gaadiid ah oo raashin gargaar ah oo dhan ilaa 1,230 metric tons una siday gobolka Bakool. Sida lagu soo warramay, waxaa hal gaari lagu dhacay Degmada Balcad oo ilaa 30km waqooyi ka xigta Mogadishu.

Gurmadka iyo Farqiyada

15kii September, hayada WFP waxay ka bilowday rashin qeybin degmooyinka gobolka Banadir (Muqdisho); raashinkaas oo gaaraya 81,000 mt kana faaiideysteen qaar ka mid ah dadkii dhowaan ku barakacay dagaaladii

socday islamarkaasna ay barbar socdaan qeybinta raashinka bisil ee 16 ka goobood ee gobolka Banadir, joogtana ka faa'iideysta maalin walba 80,000 qofood.
Degmada Waajid, waxay hay'adda WFP ka qaybisay cuntooyin isku-dhafan oo oo gaarayey 973 metric tons, ayna toddobaadkan gudihiisa ka faa'iidaysteen ilaa 58,000 qof. Intaas waxaa dheer, ilaa 20,770 qof oo iyagana la gaarsiiyey cunto gargaar ah oo la xiriirta barnaamijka quudinta cuntoooyinka nafaqada leh. Gobolka shabeelaha hoose, waxaa loo qaybiyey cunto gargaar ah oo dhan 6,200 metric tons, ayna ka faa'iidaysteen ilaa 441,866 qof oo ku dhaqan Degmooyinka Marka, Kurtunwaarey iyo Qoryooley. Hay'adda CARE, ayaa iyaduna waxay soo gebegebaysay qeybinta raashin dhan ilaa 319 metric tons oo la gaarsiiyey dadweyne gaarayey ilaa 12,220 qof oo ku dhaqan degmada Ceel-waaq ee gobolka Gedo..

Hay'adda Caafimaadka Adduunka(WHO) iyo la-hawl-galayaasheeda, ayaa waxay daawooyin u qaybiyeen Cisbitaallada, Xarumaha Daryeelka hooyada iyo Dhallaanka iyo goobaha bukaan-socod-eegtooyinka ah ee Muqdishu. Waxayna xarumahaasi si joogto ah ah u daweeyaan dadka ku dhaawacmay dagaallada magaalada Muqdishu.

Golaha Danish Refugee Council oo ah hay'ad caalami ah oo aan dawli ahayn, ayaa waxay gargaar maacuunta iyo qalabka dhismaha oo ay ka mid yihiin; Bacda wax lagu dhisto, bustayaal, dermaha la goglado, maacuunta wax lagu karsado, tuubootinka biyaha iyo saabuun u fidinaysa qoysas gaaraya ilaa 3,081 qoys oo ku dhaqan 69 tuulo iyo 10 goobood oo ka tirsan deegaannada dadka bara-kacay ee magaalada Belet Weyne. Waxay kaloo ugu deeqeen ilaa 89,850 oo baakad oo ay ku jiraan daawooyin kiimikaad oo biyaha lagu nadiifiyo iyo ilaa 184,160 tuubooyinka biyaha oo ay ka faa'iidaysanayaan ilaa 27 tuulo oo beeraley-xoolo-dhaqato ah iyo 10 goobood oo dadka bara-kacay ah.

Hay'adda Save the Children (SCUK), ayaa weli waxay sii waddaa hawlgalka biyo dhaamiska, waxayna ugu yaraan 5 litres oo biyo ah maalin walba muddo 30 cisho ah u qaybisay dadka bara-kacay oo gaarayey ilaa 87,318 qof oo ku dhaqan Belet Weyne.

Wixii Faahfaahin Dheeraad ah ee xogta Afka Ingriiska kala xidhiidh: Rita Maingi tel. 254 734 800 120 – *maingi@un.org*,
Xogta Afka Soomaaligana kala Xidhiidh: Mona Mohamed on 0733 643 737 – mohamed26@un.org
Cinwaanka Shabakadda:http://ochaonline.un.org/somalia